

## **EXPLANATION OF STATE HEARING PROCEDURES**

### **SHARAXA NIDAAMKA DHAGAYSIGA GOBOLKA**

#### **Waa maxay Dhagaysiga Gobolku?**

Hadii aad isleeday waxaa dhacay khalad ama dib u dhac ayaa ku yimid kiiskaaga, waxaad dalban kartaa dhagaysi gobil. Waaad dalban kartaa dhagaysi la dhagaysto talaabo oo ay dhagaysato adeega waaxda dhaqada iyo qoyska gobolku ama hay'ad deegaankaaga ah. Hay'adaha deegaankaaga ah waxaa kamid ah Adeega Waaxda Shaqada iyo Qoyska Degmada (CDJFS), Hay'ada Dhaqan Galinta Kaalmada Ilmaha ee Degmada (CSEA), iyo hay'ada hoos yimaada ee qandaraasyada ay kula jiraan.

Dhagaysiga gobolka waa kulan dhax maraya adiga, qof kasocda hay'ada deegaanka, iyo sarkaal dhagaysi oo ka socda Ohio Department of Job and Family Services (ODJFS, Adeega Waaxda Shaqada iyo Qoyska ee Ohio). Qofka ka socda hay'da deegaanku waxa uu sharixi doonaa talaabada ay qaadeen ama ay doonayaan inay ka qaadaan kiiskaaga. Kadibna, waxaad fursad u heli doontaa sababta aad filanayso inay ku khaldan tahay talaabadaasi. Sarkaalka dhagaysigu adiga iyo qofka ka socday hay'da deegaankaaga wuu idin dhagaysan doonaa, waxaanu idin waydiin kartaa su'aalo uu xogta oo dhamaystiran ku heleyo. Sarkaalka dhagaysigu waxa uu qiimayn doonaa xogta lagu soo bandhigay dhagaysiga waxaanu soo bandhigi doonaa go'aan ku salaysan in sharciga si fiican loo dabaqay iyo in kale.

#### **Sidaad u Dadlabnayo Dhagaysi**

Si aad u dalbato dhagaysi, lahadal ama qoraal u dir hay'da deegaankaaga ama u qor Ohio Department of Job and Family Services, Bureau of State Hearings, Columbus, Ohio 43218-2825. Hadii uu kusoo gaadho wargalin kuu diidaysa, yaraynaysa ama kaa joojinaysa kaalmadii iyo adeegii, waxaad heli doontaa foomka dalabka shagaysiga gobolka. Foomka dalabka buuxi oo u dir Dhagaysiga Gobolka. Waxaad fax ugu diri kartaa dalabkaaga Dhagaysiga Gobolka (614) 728-9574.

Waa in aad ku heshoo wargalinta 90 maalmood dalabka dhagaysiga mudo ka bilaabmaya maalinta wargalinta talaabada laguusoo diray. Balse, hadii aad qaadato kaalmo raashin, waxaad dalban kartaa dhagaysi xadidka kaalmada raashinka ee aad qaadanayso wakhtiga aad doonto ee kamidka ah mudada lasoo asteyay.

Hadii qof kale uu dalabka qoraalka kusoo gudbiyay, waa in uu la socdaa qoraal, aas saxeexday, oo aad ku cadaynayso in uu qofkani ku matalayo. Adiga oo kaliya ayaa dalabka taleefan ku samayn kara.

#### **Sida Loogu Samaynayo Dalabka Taleefan**

Hadii aanad iminka karin balanta dhagaysiga goobta adigoo u iman kari waayay gaadiid la'aan, daryeel ilmo, caafimaadka Oo xadidan, iwm., waxaad lasoo hadli kartaa 1-866-635-3748 iyo adiga oo dooranaya Inaad taleefan kaga qayb gasho. Hadii aad taleefan kaga qayb gasho, sarkaalka shagaysiga ee ku qoran ambiilkaaga ayaa kula soo hadli doona maalinta dhagaysiga wakhtiga la asteyay dhagaysigaaga taleefan lambar aad bixisay.

#### **Kaalmo iyo Adeeg Sii Socda**

Hadii ay kusoo gaadho wargalin ah in kaalmadii ama adeegii la yaraynayo, joojinayo, ama la xadidayo, waa in aad ku dalbataa dhagaysi gobolka 15 maalmood gudahood oo kabiliaabmaya taariikhda wargalinta si ay kuugu sii socoto gunadu ilaa inta go'aanka dhagaysiga lasoo saarayo.

Barnaamijka kaalmada raashinka, gunadaadu kuusii socon mayso hadii laguu diido ama hadii ay dhamaato mudada laguu ogolaa. Kadib mudada laguu ogolaa, waa in aad mar kale dib u dalbataa oo dib aad ugu qalantaa.

Hadii la badalay kaalmadii iyo adeegii wargalin la'aan, ama hadii labadalinkasta oo aad dalbatay mudo dhagaysi, waxaad lasoo hadli kartaa Bureau of State Hearings (Xafiiska Dhagaysiga ee Gobolka), si aad u ogaato hadii ay kuusii socon karto gunadu. Nagalasoo hadal, waa bilaa lacag e lambarka hoose: 1-866-635-3748, oo dooro lambarada codada ee kumanaanka ah ee laguu sheegayo.

Hadii kaalmadaadu sii socoto oo xukun uu kugu dhacay dhagaysiga, waxaa khasab kugu noqon karta inaad bixiso gunadii aad heshey ee aanad xaqa u yeelan.

Sii socodka kaalmada lagu sharaxay qaybtani ma khusayso barnaamijka kaalmada ilmaha. Hadii aad dalbato dhagaysi adeega kaalmada ilmaha, dalabkaaga dhagaysigu saamany kuma yeelanayo helida adeega inta kahoreysa mudada dhagaysiga.

#### **Shirkha Degmada**

Kulan aan caadi ahayn oo lala kulmo qof hay'ada deegaanka ah ayaa meel la iskula dhigii karaa iyadoon loo baahan dhagaysiga gobolka.

Badanaa waa dariiqa ugu dhakhsaha badan ee mushkilada lagu xalin karo. Kulankan kiiskaaga ayaa dib u eegis lagugula samaynayaa. Hadii khalad la sameeyay, waxaa lagu sixi karaa iyada oo aan loo baahan dhagaysiga gobolka. Waxaad samaysan kartaa shirkada degmada adigoo ka dalbanaya shaqaalahaa degmada. Hadii aanad ku qanacsanayn natijada, waxaa doonan kartaa dhagaysiga gobolka.

Maaha khasab in aad shir degmo gasho si aad u hesho dhagaysi gobol. Dalabka aad ku dalnabayso shir degmo dib uma dhigayso dhagaysiga gobolka.

#### **Goorma Ayaa Dhagaysiga La Qabanayaa?**

Marka ay nasoo gaadho dalabka dhagaysigu, Bureau of State Hearings (Xafiiska Dhagaysiga Gobolka) ayaa kusoo diri doonaa wargalin balanta ah oo taariikhda, saacada Iyo goobta dhagaysigu la socoto. Wargalintan waxaa laguu soo diri doonaa ugu yaraan 10 maalmood kahore dhagaysiga. Wargalintu waxa kale oo ay kuu sheegi doontaa waxaad samaynayso hadii aanad iman karin balanta dhagaysiga.

#### **Halkee Dhagaysiga Lagu Qabanayaa?**

Dhagaysiga sida caadiga ah waxaa lagu qabtaa hay'ada deegaankaaga. Hadii aand awoodin in aad tagto halkaa, dhagaysiga waxaa lagu qaban karaa meel kale oo kuu haboon ama cida kale eek u lugta leh. Hadii aad doonayso in dhagaysiga lagu qabto meel aan ahayn hay'ada deegaankaaga, noogu sheeg dalabkaaga dhagaysiga.

#### **Dib u Dhigida Dhagaysiga**

Hadii aanad ku iman karin balanta dhagaysiga, ama hadii aad mudo dheeraad ah u baahan tahay si aad ugu diyaar garawdo, waxaad ka dalban kartaa qaybta dhagaysiga in dib laguugo dhigo. Barnaamijka kaalmada raashinta, dib u dhigii waxa uu noqon karaa ugu badnaan 30 maalmood oo ka bilaabma taariikhda balanta dhagaysiga. Dhamaan barnaamijyada kale, waa in aad sabab wanaagsan oo dib loogu dhigo la timaadaa.

## **Hadii Aanad Iman Dhagaysiga**

Bureau of State Hearings (Xafiiska Dhagaysiga ee Gobolka) ayaa kuu soo diri doona wargalin meesha ka saar ah hadii aanad iman dhagaysiga. Hadii aad doonayso inaad sii wadato dalabka dhagaysiga, waa inaad kula soo xidhiidhaa Bureau of State Hearings (Xafiiska Dhagaysiga ee Gobolka) 10 maalmood oo aad u sharaxdaa sababta aad u iman wayday dhagaysiga oo aad cadayna keentaa. Cadayntu waa dokumenti ama waraaqo cadaynaya sababta aad u iman wayday balantii dhagaysiga. Marka aad sababta macquulka ah soo gudbiso, maamulka dhagaysiga ayaa go'aamin doona inay dokumentigaasi ku fulan yihin. Hadii aanad kusoo hadal 10 cisho oo aanad sabab fiicana la iman ama cadaynta aad u iman wayday, meesha ayaa laga saari doonaa waanad waayi doontaa dhagaysiga. Markaa hay'ada deegaankaaga waa qaadi karta talaabadii u qorshaysnayd.

Hadii aad kasoo hor jeedo meesha ka saarida, wargalinta meesha ka saarida ayaa kuu sharaxaysa sida aad u dalban karto ambiil maamul.

## **Kahor Dhagaysiga**

Waxaad soo kaxaysan kartaa qof (qareen, shaqaale xuquuq, saaxiib ama qaraabo) kusoo raaca dhagaysiga kiiskaaga oo kula jooga. Hadii aanad imanayn dhagaysiga, qofka ku matalayaa waa in uu keenaa qoraal adiga kaa socda oo sheegaya in uu ku matalo.

Hadii aad kaalmo sharci doonayso oo dhagaysiga kula jooga, waa inaad sii diyaarsataa kahor. La xidhiidh barnaamijka kaalmada sharciga ah ee deegaankaaha hadii aad u qalanto kaalmo bilaa lacag ah.

Hadii aanad garanayn sidaa ula xidhiidhi lahayd kaalmada sharciga ah ee deegaankaaga, lahadal 866-529-6446 (866-LAW-OHIO), waa bilaa lacag, gudaha am aka baadh Kaalmada Sharciga ah shabakada <http://www.ohiolegalservices.org/programs>. Hadii aad doonayso in wargalinta dhagaysigaaga loo diro looyarkaaga, waa inaad u sheegtaa magaca iyo ciwaankiisa Bureau of State Hearings (Xafiiska Dhagaysiga ee Gobolka).

Adiga iyo wakiilkaaguba waxaad xaq u leedhiin inaad eegtaan faylka kiiskaaga iyo hadii sharcigii qornaa loo raacay kiiskaaga. Hadii dhagaysigaagu ku salaysan yahay isduwaangalin ama shaqo iyo tobobar, sidoo kale waxaad eegi kartaa faylka shaqadaada iyo tobobarkaaga. Waxaad heli kartaa nuqul bilaa lacag ah oo duwaanka kiiskaaga dikomentitada la xidhiidha dalabkaaga dhagaysiga. Qof kasta oo adiga ku matalayaa waa in uu keeno qoraal adiga kaa socda oo saxeexan kahor inta aanu eegin duwaanka kiiskaaga ama aan la siinin nuqul dokumentiyadaada ah.

Hay'ada deegaanku kharash kuma aha inay ku tusto duwaan sir ah, sida magacyo dad xog lidi kugu ah kaa bixiyay, duwaanka kiis danbi, iyo duwaano caafimaad qaarkood.

Duwaanada sirta ah ee aanad eegi karin ama su'aalo ka waydiin karin lagu soo badhigi maayo dhagaysiga ama adeegsan maayo sarkaalka dhagaysigu si uu go'aan ugu gaadho.

## **Yeedho/Keenid**

Waxaad ka dalban kartaa maamulka dhagaysiga inay keenaan dokumentiyo ama u yeedhaan markhaatiyo sida kale aan ku yimaadeen oo muhiim u ah dhagaysiga. Waa inaad dalbataa u yeedhiga/keenida ugu yaraan shar maalmood kahore taariikhda dhagaysiga oo aad keenta magacyada iyo ciwaanka qodka ama dokumentiga aad doonayso.

## **Inta Uu Dhagaysigu Socdo**

Waxaad soo kaxaysan kartaa markhaati, saaxiib, qaraabo, ama looyawkaaga si uu kaaga caawiyo inaad kiiskaaga soo bandhigto. Sarkaalka dhagaysigu wuu xadidi karaa tirade markhaatiyaadsha ee dhagaysiga fadhiisanaya marka uu doono hadii uu ay meeshu ku yaraato. Adiga iyo wakiilkaaguna waxaad Xag u leedhiin inaad eegtaan cadaynta laguu adeegsaday dhagaysiga, inaad soo bandhigto dhinacaaga adiga oo aan lagaa dhax galin, su'aalo waydiiso, iyo inaad keento waraaqo ama cadayn si aad kiiskaaga ugu taageerto.

Dhagaysiga sarkaalka dhagaysiga ayaa duubi doona si loo sugo wixii meesha laga yidhi. Marka go'aanka dhagaysiga lasoo saaro, waxaad heli karta nuqul kaydkaas ah adiga oo la xidhiidhaya Bureau of State Hearings (Xafiiska Dhagaysiga ee Gobolka).

Sarkaalka dhagaysigu labada dhinacba wuu dhagaysan doonaa balse go'aan ma gaadhi doono dhagaysiga kadib. Balse, waxaa laguusoo diri doonaa qoraal go'aanka ah oo kasoo baxay maamulka dhagaysiga.

## **Dhagaysi Kooxeed**

Xafiiska Dhagaysiga ee Gobolku waxa uu isku dari karaa dalabka dhagaysiga ee dhawr qof waxaanu iskaga dhigi karaa dhagaysi kooxeed, balse hadii ayna jirin wax iska hor imaad ah oo kiisaska kala duwan ah iyo wixii kale ee la xidhiidh shuruucda gobolka iyo federalka ama qawaaniinta degmada. Wargalinta dhagaysigaaga ayaa kuu sharxi doonta hadii balantaatu tahay dhagaysi kooxeed.

Adiga iyo wakiilkaaga waxaa loo ogolaan doonaa in uu si shakhsii ahaan ah usoo bandhigo kiiskaaga waxaanad yeelan doontaan xuquuq isku mid ah koox ahaan sidaad u yeelan lahadly dhagaysiga kaligaa oo kale.

## **Kadib Dhagaysiga**

Waxaad heli doontaa go'aanka dhagaysiga 60 maalmood gudaheed oo kabiliaabanta maalintii aad dalabka gudbisay hadii uu dhagaysigu ku saabsanaa oo kaliya kaalmo raashin, sidoo kale 90 maalmood gudahood dhamaan barnaamijyada kale oo dhan.

Hadii aad kasoo hor jeedo go'aankii dhagaysiga, go'aanka qoraalka ah ayaa kuu sharxi doona sidaad u dalban karto ambiil maamul.

## **U Hogaansanaanta Go'aanka Dhagaysiga**

Hadii go'aanka dhagaysiga amrayo in la kordhiyo kaalmadaadii raashinka, waa inaad ku heshaa korodhkaa 10 maalmood gudahood oo kabiliaabanta maalinta go'aanka. Hadii uu amrayo go'aanku in la yareeyo kaalmadaadii raashinka, waa inaad ku heshaa xadidka cusub, yar marka danbe ee aad qaadanaysid kaalmadaada raashinka.

Dhamaan barnaamijyada kale, waa in ay hay'adu talaabandan amarka go'aanka ah ku qaadaa 15 maalmood gudahood oo ka bilaabmaya taariikhda ay soo baxday, balse markasta 90 maalmood gudaheed taariikhda dalabka dhagaysiga. La xidhiidh Bureau of State Hearings (Xafiiska Dhagaysiga ee Gobolka) hadii aanad helin gunadii laguugu asteyay go'aanka dhagaysiga.

## **Talaabo Kale Waxay U Baahan Tahay Dhagaysi Kale**

Hadii ay kusoo gaadho wargalin kahoreysay oo sheegeysa in hay'ada deegaankaagu ku doonayso inay badasho kaalmadaadii ama adeegii intaad sugayso dhagaysiga ama go'aanka dhagaysiga, waa inaad dalbataa dhagaysi kale hadii aad kasoo hor jeedo talaabada cusub. Dhagaysi ka gaar ah ayaa loo qabanayaa wargalinta cusub.